# Golaha Wakiilladda

## Waaxda Hadal-qoraalka, Shuruucda iyo Daabacaada

### *Golihii 5aad ee Wakiillada, Kal-fadhigii 12aad Fadhigiisii 4aad*

***Wakhtiga 9:43* AM** ilaa **11:380 Am**
***Taariikhda: -Salaasa 29 July 2025***

**Gudoonka: -** Md. Siciid Mire Faarax (Giire)

**Quranka: -** Md. Axmad Dayib

**Ajandaha Fadhiga: -** Doodda Xaalada Abaaraha Dalka

**Md. Cabdikariin maxamed muxumed** (5min, 31sec): - Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shir gudoonka, xildhibaanada Gollaha wakiilada, saxaafada Asalaamu calaykum waraxmatulaah wabarakaatu, mudane gudoomiye iyo mudanayaal, dhamaan xildhibaanadii halkan ka hadlay runtii waxay dul istaageen oo ay ka hadleen iyo warbixintii halkan laga soo jeediyayba xaalada abaarta ee deegaanada xeebaha gaar ahaan hawgu sii darnaadaan deegaanada galbeedka iyo guud ahaan deegaanada xeebaha iyo gubanka dalka.

Runtii waxa aynu dareen sanahay, xaalada laga soo waramay iyo xaalada aynu ka waramaynaa in ay inooga baahan yihiin gurmad, loo fidiyo dadka iyo duunyada degaanadaasi, xukuumadu waxay samaysay Guddi ka hawl gasha xaaladaasi oo heer Qaran ah oo Guddida Abaaraha ah, runtii waxa ay ubaahan tahay hawlaha iyo dedaalada socda in Guddidaasi hawlahooda si qaran oo tabantaabo leh ay iskugu ururiyaan hawlahaasi, Gollaha wakiiladuna waxa uu ka mid yahay masuuliyiinta heer Qaran ee masuuliyadaasi saaran tahay.

Waxaan Ta`kiidinaya ama ayidayaa qaadhaankii iyo kontarabiyuushankii ay xildhibaanadu soo jeediyeen, waxaan illahay inooga baryayaa insha allah inuu alle abaartaa innaga soo jabiyo, balse waxay muujinaysaa masuuliyadeena qaybta inaga began haday hawl tahay iyo haday dhaqaale iyo qaadhaan inta awoodeenu tahayba in aynu ka qayb qaadano.

Waxaan kale oo aan Ta`kiidinayaa ama soo jeedinayaa in hawlaha socda Guddidaa Abaaraha ee heer Qaran ee uu madaxwayne ku xigeenku hogaaminayo iyo xubnaha kale ee Guddidaasiba in ay hawlaha ay dar- dargaliyaan oo hay`adaha samafalka iyo hay`adaha caalamiga ahba iyo Ganacsatada dalka iyo Gollayaasha Qaranka iyo cid kasta oo ay khusaysaa, qaadhaanka iyo dhaqaalaha dadkaa loogu gurmanayo intii awoodeena ah in hawshaa xooga lasaaro.

Waxa kale oo jirta miisaaniyadii aynu Ansixinay 2024ka ilaa 2025ka loo qoon deeyay, kharashka lama filaanka ah, oo sida Abaaraha oo kale loogu talagalay iyo kharashka gurmadka oo qayb ka mid ah loo qoon dayn karo.

Waxaan soo jeedinayaa miisaaniyada Qaranka lafteeda in dib loo qaabeeyo, oo xukuumaddu ay ku noqoto oo hawlo badan oo hawlahaa socda qayb ka noqon kara, gurmad kaasi, waayo Gollaha wasuuradu ama Gollaha wakiiladu, qaadhaan yar oo ay iska jareen, hawlaha iyo Abaaraha laga soo sheegayo deegaanada Xeebaha ee Somaaliland waa hawl ka culus, miisaaniiyada Qaranka qayb ka mid ah waxa aynu u qoon dayn karnaa haday tahay madaxa ama hedhka  ama kharashka lama filaanka ah qayb ka mid ah gurmadka iyo waliba hawlaha hawl socodsiinta ah ee haday mashaariic tahay iyo haday hawl socod siinta tahayba in aynu Gunti giijis aynu galno, waa wax yaabaha aynu kaga samatabixi karno, ee ay soomaaliland iskeed ay u qabsan karto.

Hawlaha kale ee hay`adaha samafalka ahna aynu runtii iyagana aynu ku taban taabin karno in ay qaybtooda ka qaataan, waxaanan leeyahay illahay haynaga soo jabiyo abaartaasi.

Talada udanbaysa ee aan soo jeedinayaa, had iyo jeer miisaaniyadeenu uma qaabaysna, waxay u qaabaysan tahay Add home oo ah in caafimaadka wax yar lagu darro, waxbarashada wax yar lagu darro, Biyaha wax yar loo qoondeeyo, Abaaraha noocan ahi waxay inooga baahan yihiin in aynu ku talagal samayno, gaar ahaan Biyaha oo dadka iyo duunyaduba ay ka faaiidaysan karaan, oo waqtiyadan waxa ugu adeg ee dadka iyo duunyadaba dhibta ugu wayn waa biyaha, biyaha markaa dhaamanka loo yaqaan" sand dhaamiska, ee meelaha dooxyadu ka jiraan, in dooxyadaasi biyo qabatin lagu sameeyo, oo sagbad ama oo ciida hoose ay biyuhu u galaan Rechargeka loo qaban karo oo ceelasha laga faaiidaysano ama dadku ka cabayaan ama beeraha wax soo saarka ah, dooxyo badan roobabkii baa is dhimay dabeedna marka roob iyo lab aiyo sedex marka uu da`o roobkii hore ee heli jiray dhulkaasi marka uu hoos uga dhaco biyo qabatinkiina hoos ayuu udhacayaa.

Markaa dhaamamkaa waxaa loo yaqaan sand dhaamis in kor loo qaado oo Recharge lagu sameeyo biyihii dhulka gali lahaa, ayaa aynu kaga bixi karnaa, dhulka hawdka ah ama ogaadana in intii awoodeena ah  baliyo loo qodo oo mustaqbalka in aynu siyaasado noocaa ah in aynu ka yeelano ayaa muhiim ah, maalinta xaaladi timaado, maltruion ama baaq inaguma filna, ee waxa aynu ubaahan nahay qorshe, Abaaraha waxa Base u ah in dadka iyo duunyaduba ay helaan Biyo ku filan oo calaf lagu beeri karro ama ay dadku waqtiyada abaaraha ama xoolahoodu ay ku baxsan karaan.

Sababaha iminka taagani wixii Emergenzy loo qaban karayo in aynu Golle ahaan koontarabiyuushankeena, qaybna miisaaniyada Gollaha ee shir gudoonku maamulo  laga

jaro qaybna xildhibaanadeena si ay unoqoto wax ku filan oo dadka  wax aynu kaga qayb qaadan karno, markaa miisaaniyada Gollaha mudane gudoomiye in aad qaybtiina soo diyaarisaan, wixii kale ee aynu qaban karnana iyo wixii aynu ku dedaali karnana in e Guddidaa abaaraha ee heer qaran  wixii aynu laqan karnana laqabano in tabantaabadaa dadkeena iyo gurmadkaasina aynu qaybteena ka qaadano, waa kaalinteenii waana waajibkeenii, Aad iyo aad baad u mahadsan tihiin.

**Md. Axmed Xasan cali (Casoowe)** (02min, 26sec): -Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Gudoomiye iyo mudanayaasha sharafta badan Asalaamu calaykum waraxmulaah wabarakaato, mudane gudoomiye xaalada manta laga hadlayaa waa xaalad aad siiriyas ah, waa xaalad la tilmaamay dad iyo xoolo dhimanaya, iyo Abaar aad u adeg oo deegaanadeenii haysata, waxaan mudanayaasha usoo jeedin lahaa in xaalada siiriyas laga dhigo ama khatar, oo kaftan, kaftan iyo in aad lahadashid odhyanis aan halkan fadhiyin, oo hebel baa sidaa yidhi, oo face book yadii, in ay xaaladu aad u dhaafsiisan tahay manta, markaa mudanayaasha asxaabatayda ah waxaan usoo jeedinayaa, in xaaladu ay aad khatar utahay laynaga arko in ay inaga tahay.

Mudane gudoomiye innaga Golle heenu Golle fulineed ma aha, fulinteeda waxaa iska leh Xukuumada innagu waxa aynu ku leenahay, innagu waxa aynu ku leenahay in aynu xukuumada kormeer ku samayno, sidii loogu diyaar garoobey iyo sida ay hawshu usocoto, baynu ku leenahay.

Wixii qaadhaan ah ee xildhibaanadu jarayaan waa wax shaqsi oo wax meel wayn buuxin karana ma aha oo waa wax aynu halkan kaga dhawaaqinba dee hoos ama Guddi yarba loo saari karo ama shirgudoonku go`aan kasoo gaadhi karo.

Ee warbixintii Guddida joogtada ahi ay halkan ka jeediyeen, dee wey sheegeen meelihii ay soo mareen, laakiin mudadii Golluhu maqnaa 2 dii bilood iyagaa Gollaha matalayay ee sida abaarta loogu diyaargaroodey iyo xaaladeeda, Gollaha ugamey warbixin sida ay xukuumadu ugu diyaargarowde, waxay ahayd in ay warbixintooda xooga saaraan wixii laqabtay iyo waxa dhiman.

Guddida joogtada ah waxaan rajaynayaa, in ay noogu noqdaan hadii ay ka tageen warbixinta.

Waxaan annigu soo jeedin lahaa, hada oo aan taageeri lahaa hadalkii uu gudoomiyuhu sheegay, ee yidhi bal inta aynu Guddi uqabano hadalkeeniina soo ururisa, xaaladana soo ururisa in inta Guddigaa looqabto, hadana maalin kale ubalano oo bahasha si fiican usoo lafo gurno, oo Guddi inoo soo ururisa loo qabto.

**Md. Aamina cilmi fariid** (03, 20sec): - Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shirgudoonka, xildhibaanada, iyo  saxaafadaba waan salaamayaa, een in yar hadaan ka horaysiiyo

hadalkayga, xildhibaanadu waxay rabaan in ay wada hadlaan, laakiin isma dhagaysanayaan, hadaan qofkii hadlayay la dhagaysanayn senas ama macno ma samaynayo hadalkiisu, xaalada Abaarta hadaan ka hadlo abaarta waa laga hadlay sida ay wax ujiraan waa la sheegay, halka ay wax ka jiraan waa la sheegay, dhibaatooyinka waa la sheegay xildhibaanadii iga horeeyay oo dhan ayaa sheegay.

Waxaanse aan aad fikirkiisa ugu raacsanahay, macalinkayga casoowe, wuxuna koobnaanta ayay ku wanaagsan yihiin, hadalku haduu bato Nuxurkiisa ayaa luma,laakiin hadalka kooban nuxurka ayaad kala soo dhex baxaysaa, annigu waxaan ku darri lahaa intaa Abaartani wey soo noq-noqtay, iminka last 3 years Somaliland Roob fiican mey helin inkasto oo taa, ay koos garaynayso Golobal wormingka aduunyada ka dhacay, maadama oo ayna helin roob fiican waxay ahayd in laga hortago, oo lagu talo galo in ay abaari imanayso, kolayba saadaasha roobka wey sheegaan sanadka uu roobku uu yar yahy iyo sanadka uu badan yahay.

Taa marka aan ka soo gudbo innagu maxaa aynu ubaahanahay, innaga maxaa laynaga baahan yahay hadaynu nahay xildhibaanada, innaga waxa laynooga baahan yahay hadaynu nahay xildhibaanada, in aynu dheef iyo dhaqaalaba la qaybsano, shacabkii ina soo doortay ee dhibaataysan, ee ay Abaartu ku habsatay oo aynu dareenka laqaybsano, waxtar iyo wax waaba.

Hadii Guddi gaar ah loo saarayo, oo fadhi kale aynu iskugu imanayno waxba kama qabo, laakiin waxa aynu ubaahanaahy Next 2 weekska soo socda in aynu Abaaraha aynu ka shaqayno, ama kontarabiyuushan kaga qayb galno ama dadkii oo aynu utagno oo dareenkooda laqaybsano haday tahay hanoqoto.

Waxa laynooga baahan yahay shicibkii ina soo doortay ee dhibaataysan in aynaan halkan fadhiyine, in aynu halkooda ugu tagno.

Gudoomiye iyo xildhibaano waxaad moodaa marka laga hadlayo, Gobol ama qayb gaar ah oo somaaliland ah, in ay u haysataan dadka kale in aanay dhibtu saamaynayn, dhibta abaartu waa dhib Somaliland oo dhan saamaynaysa, ilaa Galbeed ilaa Barri ilaa waqooyi, waa mid saamaynaysa, markaa waxaan jeclaan lahaa dareen isku mid ah in lagaga wada qayb qaato.

**Md. Axmed Dayib Aadan (ku cadeeye)** (04min, 05sec): -Bismilaahi Raxmaani Raxiim mudane Gudoomiye iyo mudanayaal, Abaarta sida aynu lasoco, waa musiibo dabiici ah, balse soo noq-noqta illahay subxaanahuu watacaa, ugu horayn waxaan ka baryaynaa in uu innaga dul qaado, sababteedana in aynu la nimaadno oo aynu alle unoqonaa waa arrin lagama maarmaan ah.

Xaalada Abaareed iyo halkay marayso waa laga sheekeeyay, markaan mudane gudoomiye iyo mudanayaal ku soo dhawaado, waxaan xal u arkay, in xukuumadu ay dhawaqeedi dib ay ugu noqoto, waxa uu ahaa dhawaq weyd ah sida ay abaarta ugu dhawaaqdey, iyo qaadhaanka ay ku dhawaaqdey, xaalad fudud oo aan culays badan lahayn baa ka muuqatay, laakiin xaaladu wey culustahay dalku xaalad adeg, ayu uku jiraa.

Soomaalidu waxay tidhaahdaa, Abaari Gu`u bey dhcdaa, iminka guga badhtamihiisii ayaynu sii dhaafaynaa, Abaartaasina wey jirtaa jiilaalna waa danbeeyaa, run ahaantii waa xaalad u baahan in foogjignaanteeda la yeesho.

Waxaan labaad ee aan soo jeedinayaa mudane gudoomiye, Guddida ay mudanayaashu soo jeediyeen ee doonayaan in xaaladan hawsheeda soo ururiyaan, Guddi xaaladaha Abaaraha lasocota, ukuur gasha, haday noqoto taakulaynta Dadka, haday noqoto Gobolada iyo degmooyinka dhiman soo qiimayn tooda, iyo kormeeridooda, haday noqoto qorshe iyo siyaasad cad, oo inooga yaala arrimaha abaaraha ee soo noq-noqda soo odorasaan, iyaga oo la kaa shanaya hay`adaha kale ee Qaranka, si loo abuuro xaalado, iyo qorshayaal, siyaasado cad oo lagaga hortagayo, Abaaraha mustaqbalka, laguna taakulaynayo Abaarta hada taagan, iyo daruufaha ay ka tagi doonto iyo saamaynta ay ka tagi doonto maadama ay dad badan xoolihii ka dhamaadeen, hadaan alle faraj bixina inta nool laftoodu, xaaladoodu sida ay ku danbayn doonto aan lagaranayn.

Sidaa awgeed mudane gudoomiye iyo mudanayaal, waxaynu ubaahanahay, Guddi xaaladan iminka jirtana lasocota hay`adaha u xilsaaran fulinta oo dhaqaale iyo masuuliyada wadanka manta ay dulsaaran tahay innana ay waajib inagu tahay in aynu ku gacan siino wixii farsamo ah, wixii tilmaan ah wixii toosin ah intaba.

Guddigaasi in ay noqdaan Guddi ilaa hawlaha qorshayaashooda iyo hawlahooda qorshayaashooda iyo siyaasadooda lahagayo jirta, ee ayna noqon Guddi manta iyo barri wax ka tidhaahdo, halkaa ku dhaafta.

Xaga dhaqaalaha, Golluhu sidaa uu sheegay Axmed casoowe ma aha Golle fulineed, in aynu dadkeena kala qayb qaadanaa oo aynu tamarteena bixinaa waa waa arrin inna saaran oo waajib inagu ah, laakiin yaynaan facebooker noqonine, wixii uu Gollahani fulinayo, si cilmiyaysan haday Gollaha noqoto iyo haday jeebka xildhibaanada noqoto aynu isku noqono umadda yaynaan hadal uun ugudbin, markay inaga soo dhamaadaan aynu tacan ugudbino.

**Md, Maxamed Xuseen Maydhane** (1min, 40sec): - Bismilaahi Raxmaani Raxiim asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaato, runahaantii xaalada Abaarta weynu ka dharagsan nahay, Niman yahaw waxaynu ubaahan nahay xaaladu si ayna macaluul ugaadhin sida aynu uga hortagi lahayn, taasina waxay ku xidhan tahay fahamkeena xukuumadu halka uu

gaadhsiisanaado iyo sida ay ugu dhago nuglaato baaqayada loo jeedinayo, run ahaantiina ilaa iminka xaalad huban ti la`aaneed baynu ku sugan nahay.

Markaa waxaa loo baahan yahy in fadhigaa ay fadhi uga noqoto, dhawaaqna uma baahna, se waxaa loo baahan yahay shirgudoonka, iyo Guddi xildhibaano ah oo caqli usaaxiib ahi, in ay hor fadhiistaan xukuumada oo ay ku qanciyaan, dhaqaalahan wadanka soo galaayi, in ay dadka iyo duunyada ku badbaadiso, waayo markay Naf soo gaadho waxa kale oo dhan waa in la dhigaa.

Niman yahw yuuna hadalku innaga baahine, waad soo ururiseen, waad soo murtiyayseen, Guddigaa caqliga usaaxiibka ah iyo shirgudoonka, ayaa loo baahan yahay xukuumadeenii in ay ku qanciso in ay dadka iyo duunyada badbaadiso.

**Md.Fu`aad Axmed Diiriye** (4min, 35sec): - Bismilaahi Raxmaani Raxiim marka hore Gudoomiyaha iyo mudanayaasha aad iyo aad baan idiin salaamayaa, manta waxa aynu ka hadlaynaa oo aynu doodeeda wadnaa waa xaaladii abaarta, waa xaalad xaasaasi ah waa xaalad u baahan in hadalka iyo dooda mudanayaasha laweeleeyo haduu alle yidhaahdo, Abaarta sanadkani waa mid balaadhan oo baahsan, oo wadanka oo dhan wada taabanaysa, si gaar ah marka loo taabtana gobolada Dalka wey ku soo kala horaysay, weyna ku kala saamayn badan tahay.

Abaaraha soo noq-noqnaya ee sanad walba taagan, waxaa loo baahan yahay in aynu qorshe ka yeelano wax ku ool ah, oo dad iyo duunyaba idamka illaahay lagu badbaadiyo, in aynu utaagnaano marwalba xaalad gurmad ah oo deg-deg ah oo lama filaan ah oo halkanay ka dhacdey iyo hal kanya ka dhacdey waxaa ka fiican in, wadanku uu ka yeesho qorshe.

Qorshahaasuna uu noqdo mid meelo badan taabanaya oo meelo badan laga eegayo hadii alle yidhaahdo, dad iyo duunyana lagaga samatabaxo, abaaraha soo noq-noqonaya.

Abaartu waxaan filayaa in ay xoolo soo dhaaftay, oo ay dadkii marayso mar hadii ay dadkii maraysana, waa meel khatar ah waa second garaynaya mudanayaasha soo jeediyay, in ayna xukuumadu uga jawaabin culayska ay leedahay, iyo baaqeedu islahayn waan secenmenti garaynayaa markaa, talo iyo tusaalaba lagula noqdo oo abaartani baaxada iyo culayska ay leedahay, lagu baraarujiyo, Goluhuna markaa uu door wax ku ool ah uu qaato haduu alle yidhaahdo.

Maqabo anigu fasax iyo Goboladii lagu noqdo in lasoo jeediyo anigu ma qabo, sababtoo ah Guddiyo waa la diray mudanaayaasha golaha fadhiyana gobol kasta iyo degmo kasta warkeeda waa qabaan.

Waxaan soo jeedinayaa in Golaha iyo mudanayaashu ay ka shaqeeyaan, sidii baaqayada iyo gurmadyada loo xoojin lahaa, ee dabada looga riixi lahaa baaqyadaa waxa aynu

ujeedinaynaa inteenii alle wax siiyay iyo Ganacsatadeenii,inta xaalada og iyo inta aan ka war qabin in la gaadhsiiyo, in hay`adaha kuwa maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ahba in aynu gaadhsiino, Ta illaahay baa lagaga baxaaye, oo aynu xaga illahay unoqono oo culimada iyo masaajidada aynu gaadhsino.

Waqriyadii hore iyada oo salaada roob doonta salaadeeda lagu jiro, ayuu roobku iman jiray ee wax badan baa isbadalay, ee wacyigeena Diiniga ahna in kor loo qaado waan ku baraarujinayaa.

Golluhu inuu u yeedho Guddidii, Abaaraha ee la magacaabey oo uu ka waraysto xaalada, iyo waxa ay gacanta ku hayaan, iyo qorshahooda waan soo jeedinayaa hadii alle yidhaahdo.

In hay`adii u qaabilsanayd kaydka raashinkana in loo yeedho qudheedana waan soo jeedinayaa, waar maxaad haysaan in layidhaahdo, markaa anigu markaa ma qabo fasax ee xukuumada wixii talo iyo tusaale lagu kordhinayo, uu Golluhu uu istaago ayaan rabaa hadii alle yidhaahdo, illahay baa samata bixin leh ee dad iyo duunyaba in sidii loo samatabixin lahaa ayaan rabaa hadii alle yidhaah, Eebana aynu taladda saarano xaga Allana unoqono, Hay`adaha iyo xukuumadahana danbaysiino ayaan soo jeedinayaa.

**Md. Saleebaan Axmed Carab** (2min, 40sec): - Bismilaahi Raxmaani Raxiim shirgudoonka, xildhibaanada, saxaafada, iyo shaqaale waynaha waan salaamayaa, koley si isku mid ah ayaa loo hadlay, oo in ay abaartu baahsan tahay, oo ay Gobolada xeebaha leh ay u badan tahay, waa laga war bixiyay indhahana waa lagu soo arkay.

Somaliland Goboladeeduna wuxuun bey ahaayeen, in waxooga oo ah hawdka Gobolka Togdheer iyo meelaha kaleba maroodi jeex hawdkiisu ay marka hore ladnayd, markay meeshu ladan tahay ee aan roobkuna badnayn, hadana ummad badani iskugu tagto oo dadkii iskugu soo guuro, waxa laga yaabaa marka hore in ay ladan tahay, se marka danbe in ay Abaartu ku soo badato ama xoog ay saarto, markaa Gobolada aan markii hore soo maray ee ladnaa waxay ka cabanayeen, baqdin dhaw dadkii oo iskugu yimi, abaartuna markaa baqdin badan bey lahayd oo bilownayd dhulka qaarna biyo dhaamiskii waa ka bilowdey, laakiin baqdinta ay qabeen oo wixii lahayayba layskugu keenay ayaa ka darnayd.

Waxaa muuqata in Goboladii, saacadan hada la joogo hakala liiteen, hadan alle si deg deg ah Bishaa 8aad aan roob loo helin, in khatartu ay aad usii badan doonto waxaana wanaagsan sida ay xildhibaanadu sheegeen, ama innagu garanayno wixii inta ayna dhimashada iyo baaba`u bilaabmin, wixii wax ka qabasho in la hormariyo oo, deg deg loo diyaar garoobo, wxaan laqabaa wixii la hayo ee inoo yaala, ee mashaariic inoogu jirra ee hay`aduhu inoo hayaan ee kaydkena ah iyo meelaha aynu wax ku tuhmaynay,in dhaman la mideeyo.

Xukuumadana sidaa, ay hada baaq ay ujeedisay fulinteduna ka xoog badan tahay oo ay meel walba oo wax yaalaan ay u uruuriso, innaguna ilaalinta iyo dabagalka iyo wixii aynu kagaga qaybqaadan karno inaga oo ka fikirnay oo shirgudoon iyo wakiilo iyo shaqaalaba midaynay in aynu ka qaybqaadano.

**Md. Axmed yuusuf Nuur (ku- ruuje)** (4min, 54sec): - Bismilaahi Raxmaani Raxiim waxaan doonayaa in aan ku hadlo hadal kooban oo ku saabsan, mawduucan laga hadlayo ee Abaaraha, marka koowaad waxaan ka soo horjeedaa mudanayaasha yidhi, Gollaha hala fasaxo Aduunyada illahay marka wadamada xaalado ku dhacaan, Gollayaasha lama fasaxo, Gollahan sida uu usaaqiday ee uu shaqadiisii ugaran waayay waxaad ka garanaysaa, sida layskaga dabamarayo Gollaha hala fasaxo.

Golluhu waa wadankii oo wada fadhiya, Dagaalkii 2aad ee aduunka markii ciidamadu joogeen duleedka Mosco, Toga folfa layidhaahdo Gollihii Ruushka lama fasixin iyada oo ay madaafiicdu ku dhacayso ayay fadhiyeen, iyada oo la duqaynayo ayay fadhiyeen.

Gollahan hadii uu kuraastiisa ka kaco, oo uu dibada uu u baxo waxba qaban kari mayo, kuraasidan laynoo doortay baynu wax ku qaban karaynaa, doodan baynu wax ku qaban karaynaa, Guddi yar oo malakh malakh leh oo meelaha mar martaana wax micno leh maleh.

Dawladu sedx Golle ayay ka kooban tahay, waa Xukuumad, Garsoor, iyo Sharci dejin, Maxkamadu haday kuraasteeda ka kacdo miisaan maleh, Gollaha xeerdajintu haduu kuraastiisa ka kaco miisaan maleh, Gollahan waxa laga rabaa isaga oo kuraastiisa fadhiya inuu Xukuumada ujiheeyo, sidii ay Abaarta wax uga qabato, in ay Wasiirada uyeedho, in ay hay`adaha uyeedho, in ay safaaradaha Ajanabiga ah u yeedho, laakiin Gollahan inuu isu arko inuu fulin yahay, oo uu qaadhaan iyo Guddi ku meeraystaa wax shaqadiisa iyo awoodiisa ma aha.

Qodobka 2aad waxan dhacayaa Abaar ma aha, ee dhawrkii sanadood ba ina soo marta, sida aynu ku hayno Taariikhda waagii hore 80 sano mar bey inna soo mari jirtay, oo sideedtan guuro ayay ahayd markii danbe wey kasoo guurtay, soddon guuro ayay timi, wey kasoo guurtay sided guuro, iminka waa sanad walba.

Maxaa Abaarta sanad walba ka dhigay, waa isbadalka cimilada, isbadal cimilo ayaa jira sanad walbana waa inoo Abaar, wadankenuna waxa uu in yar ujiraa inuu saxaraha uu in yar ujiro, Doorkan waxaa inoo nasiib wanaag ah waxaa isku soo beegmay xiligii sanad miisaaniyadeedka, iyo xiligan ay Abaartu taagan tahay.

Waxaan odhan lahaa miisaaniyadeena iyo ladagaalanka cimilada oo ay Abaaruhu kaw ka yihiin, aynu isku sal jarno, Deegaanadda ay abaartu saamaysay marka laga hadlayo, Gobollada Galbeedka ee ay Abaartu ku jirto waxaan la qaba, koonfurta Hargaysa

xildhibaanadii iga horeeyay sida aan qaarkood ka maqlaayay waxay lahaayeen, Geogaraphgii qaldanaa bey raacayeen oo waxay lahaayeen, Bariga Somaliland iyo Galbeedka Somaliland, ayay ka hadlayeen.

Deegaankii candho dhexe ee aan lasheegi jirin sidii buu yahay, Qaaciidadaa qaldanayd baa lagu socdaa, Baligubadle ilaa bariga Hargaysa, oo koofurta Gobolkan ah wax allaale wax khariirad ah oo ay ku jirtaa ma jirto, maca dooda Gollaha wakiilada.

Waagii hore, ee xukuumadii hore ee isbadashay, cunaqabatayn baa saarnayd iminkana waxaad moodaa cunaqabatayntii in aan laga qaadin, Abaaro ayaa ka jira, Biyo la`aan baa ka jira, caafimaad la`aan baa ka jira, wax Riig ahi dhulkaa kama jiro, sanad walbana waa Abaar halkaa xukuumada iyo hay`adaha oo wasaarada biyuhu ugu horayso waxaan ku baraarujinayaa, dee abaartu Gobolada ay ku cusub tahay baa ka qaylinayee, kuwo ayna kaba bixin baa jira.

Waayo Meesha aan riigba lahayni ee aan dhaamba lahayn, ee aan biyo soo saarba lahayni, iyada mar walba waa u abaar, hadaan hadalkayga soo gabogabeeyo xildhibaanadii hore ee muxaafadka ahaa ee lahaa 3bilood hala bixiyo waxaanu leenahay, waar xildhibaanadii mucaaradka ahaa ee iminka muxaafadka noqdey wali dhiishoodu may cagaarin, kaydkiinii hore hadad soo saaraysaana waad ku mahad santihiin.

Gollahana loogama baahna qaadhaan, Tallo ayaa loo baahan yahay, Taladu waxa weeye Xukuumada aynu la xisaabtano Abaaraha aynu ku jeedino, Diwaan galinta iyo waxan lagasheekaynayo ee bilaa micno ah ee loo jeedinayo aynu ka jeedino, shaqadeena aynu qabsano.

**Md. Maxamed Xuseen Jaamac (Rambo)** (2min, 4sec): - Bismilaahi Raxmaani Raxiim xildhibaanadu wey mahadsan yihiin sida la sheegay deegaanadaa xeebaha waqooyi ayay ka bilaaban tahay, laakiin deegaanada kale haday Barri tahay iyo haday candho dhexe tahay iyo haday hawdka Hargaysa tahayba, Abaartaasi wey ka jirtaa laakiin waxaa loo baahan yahay, waa arrin xal ah.

Xalkaasina waxa u uku soo ururayaa tusaale ahaan deegaanada, sida Axmed Nuur Guruuje sheegay, ee hawdka Hargaysa, salaxley, Baligubadle, Balicabane, areayadaas oo dhami malaha, Balli malaha, dhaam malaha, Riigna malaha waa dhul ubaahan in isha si gaar ah loogu hayo, waayo intaa yar ee ku sii hadhayna, Abaartaasi ey ku sii kordhaysaa.

Waxaan soo jeedinayaa dhaw qodob, Qodobka 1aad waxa weeye sanaaduuqda miisaaniyadeena ku jira ee, sanduuqa lama filaanka layidhaah, iyo sanduuqa kaydka qaranka la yidhaahdo, in dhinaca Abaarta loo leexiyo, ee miisaaniyada Qaranka ee 2025ka.

Waxaan kale oo aan soo jeedinayaa, Xukuumadu samayso waxa loo yaqaan Gunti giijis, Dawladaha dunidu xiligan oo kale markay dhacaan arrimo Gunti giijis ah ayay sameeyaan.

Guntigiijiska maxaa kamid ah?

Waxaa ka mid ah in 10 Baabuur ee wasaarad kastaa leedahadahay in hal baabuur shidaal lagu soo kobo, oo shidaalka iyo baahiyaha kale loo leexiyo dhinaca Abaarta.

Waxan kale oo an soo jeedinayaa mudane gudoomiye iyo mudanayaal in Guddi gaar ah lasameeyo, ay Guddigaa gaarka ahina ay utagto Guddiga Abaaraha, ay war rasmi ah ay ka soo qaado, waa warbixintii Gudoomiye ku xigeenka Golaha ka horjeediyay iyo tii Guddiga joogtada ahiba, wali weyd ayay ahayd, wali Abaarta rasmiga ah warbixinteedii ma hayno.

In xukuumada aynu culays ku saarno, in aynu ku duljoogtaynu arrintan, waayo ayaantii dhawayd, oo qaabkii ay maalintii dhawayd uga hawl gashay ay uga hadashay waxaan aamin sanahay inay weyd tahay, xukuumadu waa in ay soo saartaa, oo miisaaniyda laga bedalaa labadaa sanduuq, ee loo yaqaan kaydka lama filaanka ah, iyo kaydka Qaran oo labadaas sanduuq loo wareejiyo xaalada Abaarta iyo in ay samayso xukuumadu Gunti giijis.

**Md.Ibraahim Maxamed Jaamac(khadar-guun)** (5min, 23sec): - Bismilaahi Raxmaani Raxiim Gudoomiye aad baan ku mahad naqayaa adiga iyo xildhibaanadii halkan dooda ka dhiibatay, waxa aynu ka hadalaynaa waa Abaar hadii aan hadalka qodobeeyo aniga oo ka faa iidaysana wakhtiga gaaban aan hayo, Dawlada mid baan leeyahay, Xildhibaanada mid baan leeyahay, Ganacsatada mid baan leeyahay, Guud ahaan shacabka soamaliland mid baan leeyahay, horta dawladi waxay ugu naxdin badan tahay marka ay col iyo abaati ku kulamaan.

Bajadakay ku shaqeynaysana waa "saddex boqol iyo todobo iyo afartankii milayan" ee aynu halkan ku ansixinay iyo waxa ay ka hesho intertational ham owtka horta nin xil qaaday eed qaad iyada uun bay masuuliyadu saaran tahay, anigu dawlada uhadali mayo dadkii na doortay ayaan uhadlaynaa ee ana ku fadhino kurastooda, anigu waxaan la qabaa xildhibanda qaba inaan golaha la fasaxin goluhu waa inuu gutaa shaqadiisa, dawladuna waa inay dadaashaa oo ay wixii kasta oo ay down ses ku sameyn karto dhaqalaheeda haday xafalado tahay haday socdaalo badan tahay haday tahay wixii laga marmi karro ina Abaarta loo hori mariyo sidii loo si kala liito. Gobolkaa Awadal manta Abaarta galbeed keedu aad bay noloshu usii adaga tahay waynu ognahay waa dhul kuleelo badan leh, xeebtana waliba dhulkeena marka usii kaco aad bay uyartahay.

Abaarta galbeedka ka bilamatana waligeed aad baa looga war waraa, ina kastoo abaruhu aya ku badan bariga markay dilaacan, Madax weynaha ismaciil cumar geele jawaabta dagdega ah ee uu kasoo bixiyey waan uga mahad naqayaa gobolada Kalena inataa in leeg Madaxweyne usoo dir baan lee yahay, bowdo rag malinba midbaa qawan oo Abaari way jirtaa, Jabuuti mar loo gurmaday way jirtay bari hore oo xitaa xoolo loo geeyey laba kun iyo shan boqol oo xoolo aha wakhtigii udubka, waynu isku leenahay ciyiga iyo soohitaanka, Dawaladana mida baan leeyahy madaxweyahan ninka reerkisa kaa soora nin dheh, ninka reer kale kaa soorana nimayaal dheh, hadii isa waydiintadu jabuuti gadhay aduunka Kalena waxa aan leeyahay wasarada arrimaha dibadu ha shaqeyso, intertational haday tahay fow haday tahay inay shaqeyso oo dadka wax waydiisano weeye, inaga ina la yidhaahado halkaasan la qabaa Xildhibaan Amina, Xildhibaan Casoowe Xildhibaanada kale inagu waxa aynu nahay golle xeer dajin manihin fulintii guddideena waxaynu ka bixin karnana waa uu yar yahay, nin wallaba waxa kusoo rawaxaya dadkii abaartu haysay baa alababka nagu soo qaracaya haday raashin tahay haday dawo tahay, war nin walababa inatay gubtay isagay hoos taalaye manta gudoon keena iyo inaga wixii ka go' aa hala eego laba boqol laysala qadayaa bishii iyo saddex boqol laysala qadayaa waa meesheeda.

Kuwa aan doonayo midhka ugu weyn inan usheego waxa weeye ganacsatada war ilaa mobil kayaga ayaa tobban goor lacag tayadu ku socotaa, ganacsato arki maysid waligaa bali fican bay qodeen ninbaa saadex boqol ku deeqay wado, inankaa Cumar Caydiid ayaan xasuusataa barigan dhisaynay wadada cada **Hal milyan iyo sided boqol** ku deeqay

Waligay ma maqal taajir yidhi waxbaan qabanyaa, Awdal tijaar bay leedahay, Hargeisa tijaar bay leedahay, Bari tijaar bay leedahay Tijaarta waxaan leeyahay Dubay guryaha aad ka dhisateen ee fadhista molasha ee ka baxsaday inay arkaan dadkooda gajaysan

Ifka laysaku naxaaye ilaka laysama gar gaarsho, ganacsatada waxaan leeyahay sidaa dawlada martida lagu yahay baa yagana marti lagu yahay ee hana shaqeysanina ee dadkiina wax ku soo celiya markay baahan yihiin, ka gadha gurmadaka biyaha ka gadha gurmadka calafka gurmadka dadku dawooyinka ay ubahan yihiin. Wasarada caafimadku inay yeelato mobal waa muhiim Xanaanda inay eegato xoolaha iyo xaladoodu waa muhiima. Wasarada arrimaha gudduhu inay qabteeda ka qadato ta caafimadkuna inay eegto dadka , iyaga oo eegaya imika galbeed bay kasoo mulaaxataye. Horya inaga shaqadeena waxa inagala rabaa nin wallaba oo xildhibaan aha inuu degankiisi war bixin

ka keeno, inaga oo tageerayna xildhibadana Galbeedka kasoo war bixiyey iyo gudoomiyahaba nin wallaba iyo gabadha waleeba degaan kagii kasoo xuuran siday wax ujiraaan aynu usoo gudbino dawlada aynu la shaqeeyno kolba waxa ay heli karto.

Inagana yeynaan odhanin min Boqol kun iyo waxaas aynu sameyno horta aniga hadalkii ana odhan lahaa guruuje ayaa iga hor idhi, raga sayaxa qoobka kula jiraya inay nah or boodan ma jecli Abaartu way inala joogtaba Wasalamu Calaykum.

**Md. Xuseen Aadan Cabdi** (4min, 15sec): - Bismilaahi Raxmaani Raxiim shirgudoonka, mudanayaasha, saxaafada iyo shaqaale waynahaba marka koobaad waan salaamayaa waxaan filayaa mudanayaashu in badan bey dooda soo wadeen, waxayna iskugu ururaysaa wacyiga manta yaala oo ay kaw ka tahay abaartu, sida rag horeba ka dhawaajiyay dalka waxa aynu ogsoonahay in Dalka ay biyo la`aan iyo abaar ay ka jirto, cuna la`aani jirto, wixii laqaban karo ayaa la tilmaamayaa dalku wuu balaadhan yahay, waanu kukala horeeyay Abaarta, Galbeedku abaarta wuu ka horeeyay iminka halka ay marayso, Barigii laftiisa ayaa udarrn.

Khaasatan inta aan warka ka hayo, Gobolka Togdheer iyo Daadmadheedba, meelaha qaar foostada biyaha ahi waxay maraysaa 40kun oo shilin, waana bilow oo xiliga aynu ku jirno waad garanaysaan waa xiligii Gu`ga ama xagaaga, sidaa darted waxaa dhib ah oo Meesha yaala ma jiraan dhaamam, iyo Riigag udhaw toona, Daadmadheedh inta uu ka tiro leeg yahay meel biyo looga soo dhaamiyo waxa ugu dhaw, Riiga kabadheere.

Sidoo kale hawdkiisa ma jiraan dhaamam ay biyo ku jiraan loo xidhay oo la intifaacsanayo, Goboladaa bariga hore ayay ugu dhacdey hagrasho hore ayay uga madhnaayeen wax qabadkii dawladeed, sidaa darted wixii laqaban karo ayay manta tahay in laqabto.

Waxaan soo jeedinayaa, waa lasoo maray Gobolada galbeedka xildhibaano ayaa soo maray, wasiiro ayaa soo maray, warbixinteedii waa tii manta laylana wadaagayay, Bariga cid tagtay oo soo kormeertay ma jirto, waxaan soo jeedin lahaa xildhibaanadii kasoo jeeday Goboladaa Bariga, hasoo eegaan warbixintooda ha keenaan hadii uu alle ka dhigo.

Waxaynu ogsoonahay oo aan lasoconaa, sida Gobolka Daad madheedh xoolihii joogay inkasta oo ay dadku ay hawdka uga guureen xoolihii joogay, sida aanu warbixinta ku hayno, wey bakhtiyayaan xoolihii dadkaa manaafacaadsanayay, cidii waxaa haysatay mar haday wixii ay haysteenba uu bakhtiyayo, dadku waxa ay ku nool yihiina waa laga ranayaa, waxaan filayaa indho- indhayn farabadan halagu soo qaado.

Xildhibaanadii Gobolada kasoo jeeday ha baxaan iyaga oo koley ku xisaabtamaya, Goboladu masaafda ay jiraan iyo fogaantooduba, waxaan odhan lahaa oo aan soo jeedin lahaa hala tago oo warbixin halaga keeno ooh ala soo kormeero.

Xaga xukuumada waxaan filayaa dee baaq ayaa xukuumada hore uga soo baxay Guddi ayaa la sameeyay uu madaxwaynuhu gudoomiye uyahay ayay xukuumadu samaysay, in badan oo Galbeedka ah wey gaadhsiisay cunto hadana waa lawadaa, weyna ku mahadsan tahay, manta oo udanbeysay Gobolka saaxil baa loo raray raashin oo u uku socdaa, waxaan leenahay xukuumaduna haka kordhiso, wada shaqaynteenana aynu aynu udiyaar garawno dhamaanteen golaha marka ay noqoto, anigu maqabo in aynu nidhaahno meel baa laga soo doogay, iyo waxbaan lahaynin ee qof kastaa waxa uu hayo ayuu wax ka bixiyaaye, aynu kontarabiyuushanka wax ku darsano.

Shirgudoon ahaan Guddi hawsaaro Guddigaasi hasoo eegto wixii qorshe ah haynoola timaado wixii qorshe ah, innaguna ka Golle ahaan aynu ka qaybqaadano tabarucaadka, ayaan soo jeedinayaa.

**Md. C/naasir Yuusuf Cismaan** {3mint, 13sec}: Bismilahi, Rahmani Rahim, Mudane Gudoomiye, Mudanayaasha, Shaqalaha iyo bahda Saxaafada ASc Mudane Gudoomiye waxaan qabaa wixii war bixin ah iyo wixii xog ah waxa inagaga filan intaa gudidaa joogta ah iyo Gudoomiye Cali Xaamud inoo sheegeen. Markaa inanguna haddii aynu dood bilawno intaa ayuun baynu sheegaynaa iyo in lamid ah, Somalidu waxay tidhaahdaa, hoo u baahan, Hadal waxba kama taro." Abaartani Gobolada galbeedka oo kaliya maaha Saaxil weynu ognahay, Sanaag weynu ognahay dee Gobolkaa Saraar baa ka mid ah iyada laftigeeda; Togdheer shalay oo ugu danbeysay badhasaabkeedu gudidii abaaraha magacaabayay malaha inta yar ee biyahu ku sii hadhsanyihiin waa intan koofurta Hargeysa iyadana baadku wuu yaryahay. Markaa waxaan qabanaa oo argnaa in Abaar baahsani Dalkii oo dhan ka jirto, horta Ilaahay waxaan baryaynaa inuu inaga soo furto.

Haddaba su'aasha jiraa waxay tahay maxaynu inagu Gole ahaan kaga qayb qaadanaynaa ta ina hor taalaa waa taas, xukuumadu guddi bay saartay inagu Dalka oo dhan beynu matalaynaa oo goboladoo dhan bay manta saameysay waajib baa ina saaran ma halkan baynu fadhinaa oo aynu nidhaahnaa maanta Abaar baa jirtee waxaas baynu kaga qayb qaadanaynaa mise Dadka iyo duruufta ay ku jiran baynu tagnaayoo soo dul istaagnaa.

Aniga Gudoomiye waxay ila tahay labada week ee soo socda aynu gobolada dalka u kala baxno intaynu halkan fadhiyi lahayn aynu duruufta maanta dadkeenu ku jiraan aynu la qaybsano inaguna Boqol kun oo Dollar {$100000}aynu ku caawino oo aynu iska jarno ama mushahar ama maamul ama shir guddoon isku wada daroo li'ana maanta malintaynu halkan fadhiyi lahayn maaha.

Dadka waxa laga sheegayaa iyo duruufta ay ku suganayahiin maanta Gudoomiye wax aynu adkaysan karno maaha waa Biyo la'aan waa baad la'aan waa cunto la'aan waa nafaqo daro magaalooyin dhan baa laga guuroo laga hayaamay waa ceelashii oo gudhaya

qaar biyaha meel fog looga keenayo dee tii aynu maanta halkaa fadhiyi lahayn maaha; markaa aniga Gudoomiye waxay ila tahay aynu fadhiga ka kacno, aynu lixda Gobolba u kala baxno intaynu is qaybino gobol walba wakiiladiisi waa joogaa aynu wixii aynu kaga qayb qaadanayno cadeyno xaalad gurmad ah oo dag dag ah aynu galno fadhiga ka kacno bulshadana waxaynu ugu baaqaynaa in ay ka qayb qaataan guddida Abaaraha aynu la kulano laftigooda oo aynu fadhiga ka kacno umadeenii baa inoo baahane baan odhan lahaa anigu waana mahadsantahiin.

**Md. Faysal yuusuf Jaamac** {1mint ,30 sec}: Bismilahi Raxmani Raxiim waa mahadsantahay Gudoomiye Mudanayasha golaha wakiilada, shirguddoonka, shaqaalaha, saxaafada dhamaan ASC. Gudoomiye dee sidaa aynu war bixinaha ku helayno xaalad daran baa ka jirta dalka insha Allahu tacaalaa mana aha galbeed oo qudha dalka oo dhan bay ka jirtaa Abaartu Gudoomiye markaa waxa loo baahanyahay in aynu ka hawl galo inaga wixii waajib ah ee inaga saaran, wixii aynu ku tari karno ku tarno si kastoo aynu uga qayb qaadan karno gurmadkaa abaaraha in aynu ka qayb qaadano ayaa loo baahan yahay imika galbeed baa laga war bixiyay oo xaalada ugu darani ay ka taagntahay lkn meelo badan oo Dalka ay Abaaro ka jiraan ayaa jira , hawdka Gobolka Togdheer oo kale abaara ka jira Gobolka Sanaag abaara ka jira markaa Gudoomiye way baahsantahay abaartu waanay kala darantahay uune lkn way jirtaa abaarahu waliba Gobolka Togdheer marka aan yara dul istaago isagu dee biyaba ma leh oo Galbeedku dee biyaabu heli jiray; lkn Togdheer marka abaari ku dhaco waxa weeye waligeeba ceelalna ma leh riigagna ma leh markaa waanay ka jirtaa Abaartu Gudoomiye wixii xadka ka hooseeya markaa aynu sidaa xildhibaan Qodax sheegay in aynu hawl qabano ayaa loo baahan yahay, hadaluun looma baahana inaynu ficil samynaa loo baahan yahay Wa Salaamu Calaykum Wa Raxmatulahi.

**md. Axmed Cabdi muuse(inni)**(3min,2sec): - Bismilah, Raxmani Raxiim, Alxamdulilah calaa Rasuuli Laah SCW; halkan waxaan ka salaamayaa shir guddoonka, Mudanayaasha, Shaqaalaha, Saxaafada dhammaanba intaa dabadeed waxa aynu ka hadlaynay arin Abaardeed. Abaartani waxa ay soo socotay muddo sadex sano ah, maaha mid maanta uun dhacday sadexdaa sanaba Roob yaraan baa jirtay cid ba meel ay soo jirtay markaa waxa loo baaahan yahay inaynu hadal uun wadno maaha dadku waxay u baahan yahiin wax la siiyo iyo xoolahuba markaa bixitaankeeda laftarkiis ayanu leenahay Gobolada aynu tagno waxa haboon in aynu meeshan wax ka abaabulno cidii meel u baxaysaaba ay wax sii qaado; markaa waxaan leeyahay Abaartasi tu biyood tu raashineed tu baad ama calaf xoolada, baahiya kalee Caafimadka Hooyada iyo Dhalaanka waliba caruurta oo qaarkood mall nutrion ay yihiin in laga dadaalo oon gaadhi karinba inta wax loo soo sido . Waxa loo baahanyahay 2,3 days in aynaan wax kale qaban in sidaynu Dadka ugu gurman lahayn oo wax ugu heli lahayn galno oo qorshayaal dajisano.

Abaartu maanta waxay haysaa xaga galbeedka ayay u badantahay lkn waxa weeyan sida aynu u baranay Abaartu wey fidaysaa wey baahaysaa marka danbena barri bay ku danbaynaysaa , markaa waxa loo baahanayay tan imika haysa galbeedkana inaynu gacanta saarno ta bari ku sii socotana aynu ka sii digtoonano oo dadkana aware aynu galino oo wacyi galino wixii la gaadhsiin karana loo sii tabaabusheyo.

Waxaan leeyahay in gollaha wasiiradu waxa ay balan qaadaadeen in mushaharkooda hal bil ku deeqeen abaaraha, waxaan leeyahay Golaheenan Wakiiladu sadex bilood aan ku deeqno.

Si aynu dadkaa wax ugu qabano aynu ka nimid Meesha u horaysaynu wax ka qaban karnaa waa meeshaa intaynaan dadka kale gaadhin. Allahu mustacaan warbixinadii uu bixiyay Gudoomiyaha Gudida Joogtada ah, Gudoomiye xigeenka labaad ee Golaha Wakiilada waxa ay inoo sheegeen intii ay mareen wixii jiray.

Waxa aynu ognahay warbixino kale oo la inoo soo dirayo oo ka baahsan intaas markaa waxaan leeyahay fadhiga ha laga kaco Cabdinaasir siduu u hadlay iyo Faysal waxaan qabaa inaan si dag dag ah wax u qabano dadkana u gurmano inagay ina sugayaan cid u maqani majirto markaa ama Tijaarta aynu u qaylino ama Dawlada aynu u qaylino, inaan fadhiga ka kacno oo aynaan meesha fadhiyin baa loo baahan yahay  Wasalaamu calaylum.

**Md. Bashiir Xuseen Xirsi** {6mint, 10sec}:  Bismilahi Raxmaani Raxiim, Shir gudoonka, Mudanayaasha, Shaqaalaha iyo Saxaafada dhamaan waxan ku salamayaa salaanta Islaamka ASC.  Intaa ka dib walaal maanta waxaan isugu nimadnay inaan ka hadalno xaalada Abaaraha ee wadanka, xaalada abaaraha ee wadanku waa arin wadanka aad ugu baahsan sida ay Xildhibaanada qaar sheegeena, Abaartu maaha mid deegaan kaliya ku kooban waa xaalad wadanka oo dhan saameysay oo meel kasta oo Somaliland ka mid ah ka jirta maanta.

Lkn dadku waxa ay u kala jilicsan yahiin sida meeshaasi kaydka raashina iyo kaydka biyaha ee ay haystaan meeshasi ayay u kala jilicsan yahiin oo ay abaarta u kala dareemayaan taasina waxa ay kamid tahay imika kolka la eego imika macaa galbeedka laftiisa meelaha qaar baa aad ugu jilicsan abaarta oo ay ka muuqataa, meelaha qaarna way soo socotaa lkn waa arin wadanka oo dhan haysta; wey soo kala horysaa waxaanay u kala horaysaa sida ay Dadku u kala itaal yaryahiin ee kaydka biyaha ay haystaan iyo kaydka raashinku u yaryahay.

Haddaba su'aasha is weydiinta leh waxa weeye inagu hadaynu nahay Xildhibaanadii Golaha Wakiilada iyo xukuumadii Somaliland dhan inagu goormaan ogaanaa in wadankeena Abaari ku dhacday, ama in wadanka Abaari hayso.

Ma waxaan ogaana kolka ay Dad dhintaan iyo xoolahuba ay dhintaan oo aan gurmad bilawnaa; mise waxaan leenahay Ha'ayado kale oo inoo ilaaliya oo sheega marka Abaartu soo socoto, halaka ay marayso, si looga hortago oo aritaa looga gurmado.

Aniga waxa ii muuqata sida ilaa sanadahii ugu danbeeyay aynu arkayno wadankeena in aan dareeno in marka qofka u horeeya uu dhinto ama xoolahu ay leedaan, taasina wadankeena ceeb bay ku tahay, waxay ku tahay shaqo xumo, dhibaato farabadan baa arintaa inaga haysata waxaan leeyahay Ha'ayada la yidhaa Ha'ayada ka hortaga aafooyinka iyo kaydka raashinka Ha'ayadaasi wax warbixin ah oo ay ka soo gudbisay abaaraha wadanka ku soo fool lahaa bilihii inaga tagay miyaynu aragnoo miyaynu maqalanay; ma arag anigu wax ay ka soo gudbisay sadaal. Wuxuu u baahanyahay Roobka imika aduunyada waa la saadaliyaa inkastoo tii Ilaahay ay meesha taalo oo saadashu wada sax ahayn, hadana waa la saadaliyaa waa laga hor tagaa.

Waxyaabaha kale waxa ka mid ah Ha'ayadaasi marka ay Abaarahu dhacaan sida imika wax badan ma qaban karto oo waan ognahay oo wadankeenu waa koobanyahay Ikn waxa jirta in marka qaylada ugu horaysaa ay timaado, in Ha'ayadaasi ay awood u leedahay in gurmadka u horeeya ay iyadu bixiso oo meelaha ay wax ka soo baxeen ay markiiba gaadhsiiso.

Lkn imika waxa inoo cad anigu wali Ha'ayadaasi waxay bixisay aanan aragba, waxa kaloo Iyana jirta in marka in markiik xilka lalal kala wareegayay Raashin farabadan lagu wareejiyay Gudoomiyaha Ha'ayada cusub oo Ha'ayadasi haysto.

Raashinkaasi melna ma gaadhin odhan maayo Ikn meelahii aan imika dareen sanayn ee abaarta ka jirtay waxba ma gaadhin oo ma arag anigu; taasina waxa weeyaan ceeb ina dul saaran weeyaan.

Anigu horta waxaan odhan lahaa Ha'ayadaa horta laftigeeda ha loo yeedho Golaha aynu hor keeno ha lagala hadlo shaqadeedu waxay tahay kaydka ay hayso ee wadanka u hayso intee in leeg buu leegyahay, ma in lacagta loo kordhiyaa ma shaqadeedaa xun, maxaaa jira?.

Waxaan odhan lahaa Ha'ayadahaasi waxa weeyan in inagu haddii aynu awoodii haynana aynu u kordhino , haddii ay iyada maamul xumo ka jirtana in la saxo si aynu uga hor tagno abaaraha noocan oo kale ah.

Qodobka kale ee aan ku darayaa waxa weeyaan Xukumadeenu waxa weeyaan waxay sameysay Ilaahay khayr ha siiyee way gurmatay oo shir bay iskugu yimaadeen Wasiirada, Ikn xukuumadu wax lacag ah oo ay ku dhawaaqday oo ay ugu talagashay abaaraha wax kaga qabato kumay dhaqaaqin, waxa ay sheegtay in Mushaharka Wasiirada iyo xukuumaduun ay kaga qayb galayso abaarahaasi, taasina mid ku filan oo meesha qabata maaha.

Waxa weeye markaan argano Ha'ayadii aafooyinka xukuumada awoodoodii hadda sheegay iyo xukuumadii oo musharahkii Wasiirada iyo Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka ku balan qaaday waxba arintaa kama qaban karto habo yaraateee; taasina waa dhaliil kale oo xukumadeenu ay leedahay weeyaan iyo u diyaar garawga abaaraha ee wadanka ka taagan.

Waxaan odhan lahaa anigu imika wadanka dhibaato badan baa ka taagan abaartu intaa way ka xoog badan tahay wey soo socotaa Goboladu wey kala danbeeyaan , habkii loo kala kayd badnaa bay ukala danbeeyaan.

Waxaan odhan lahaa arintaa waa in aynu shir gaara ka yeelano Ha'ayadaha ay khusayso abaaraha oo wadankeena ku soo noqnoqda ee Beeraha, Wasaarada Xanaanada Xoolaha waxoo dhan inaan u yeedhno oo ka waraysano,; waxyaabaha ay ugu diyaar garoobayaan Abaaraha soo noq noqdaya oo jawiga guud ee aduunayadu wuu is badalee,

Imika inaguna waxaynu ogayn kolka wadankeena laga hadlayo Gu'ga Roobku wuxuu inoo soo bilaabmaa in kastoo Galbeed ka bilaabmo March 23 meelahaas buu soo bilaabmaa;

Roobkii march 23 bilaabi lahaa imikana waxaynu ku jirtaa July oo dabayaaqa ah oo maanta dhamaatay, afartaa bilood roob ma di'in weynu ogayn roobka dayay roob yar buu ahaa in ay abaari wadanka ka jirto cidkastaa garanaysa xitaa hadii la daayo saadasha, Dadkii waxa la sugaya ilaa marka u danbeeya ee Dadku ay dhintaan ee xoolaha la jiidee dadkiina maydkooda la helo ayaa la ogaanayaa.

Imika xagan Galbeedka laftarkiisa ee ay ka soo arbixiyeen Gudoomiyaha Gudida joogta ah iyo Gudoomiye xigeenka labaadba haddana waxa jira oo xalay aan la hadlayay dad ilaa maanta aanay waxba gaadhin haba yaraatee, xitaa hal biyo ah oo booyad ah loo Shubin,

Oo gaajadii u dhimanaya markaa anigu waxaan odhan lahaa iga raali ahaada waan idinku dheerayay waxa weeyaan arintaasi waa arin aad u balaadhan waxaan odhan lahaa in aynu qorsho gooniya ka yeelano.

Inagu maanta dadkoo dhan baan matalnaa Dalkoo dhan baan u nahay wakiiladiisii, meel kastoo dhibaato ka dhacdana waa inaan u gurmano, imikana waxaan ku soo gababaynayaa oo taageeri lahaa in Golaha laba week oo fasaxa la galiyo oo ay gurmadka

ka qayb qaatan, Golaheenu wixii awood dhaqaale ah ee uu karanaya ugu deeqo abaaraha waana mahadasantahiin Salaamu calaykum.

**Md. Cabdikariin Hugur Cabdi** {2mnt,52sec}: Bismilahi Raxmani Raxiim Mudane Gudoomiye Mudanayaasha, shaqaalaha marti sharafta Aslaamu calaykum.

Runtii doodeena maanta waxa ay ku saabsantahay abaaraha ka jira dalkeena halkan waxaynu ku fadhinaa 82 Xildhibaan oo matalayala Gobol kata oo kamid Somaliland, runtii waxaan u malaynayaa inaanu jirin xildhibaan aan lala soo hadal ama abaartaa lagala soo hadal inuu halkan fadhiyo u malayn maayo.

Abaar baahsan oo aynu wada ogsonahay baa dalkeena ka jirta taas oo u baahan gurmad iyo wixii la qaban karo, dee horta marka hore Ilaahay baa deeqdiisu bila Adanka gaadhaa ingu waxaynu tarnaaba way yartahay, horta marka hore waxaynu baryaynaa in Ilaahay dadkaa abaaraha ka soo furto inaynu u ducaynaaba marka hore kow ah.

Mar labaadkana wixii aynu qaban karno inaynu isku dayno, runtii waxaan soo jeedin lahaa anigu Abaarahaasi nafaqo daray leeyahiin, biyo la'aan bay leeyahahiin, raashin la'aanbay leeyahiin, abaarahii abarahan ka horeeyay waxay ku dhaameen tii tan ka horaysay ee aynu halkan Golahan fadhinay, waxay lahayd galbeedkaa berigaa loo gurmadoo wey kala yar hadhsanayd, doorkan waxaad moodaa inay tahay abaar balaadhan oo meel lagu baxsado iyo meel loo guuro oo loo cararaa toona ayna jirin.

Runtii waxaan anigu talo ahaan soo jeedin lahaa iyadoo doodaa ragg horena ka hadlay sida aynu wada ognahay in abaarahu ay baahsanyahiin wada jiraan matalaadii dhabta ahayd ee Gobolada Somaliland ay ka koobantahayna halkan fadhiyaan; talo ahaan waxaan soo jeedin lahaa week-gaa soo socda in aynu qorshe sameysano cidii aynu isleenahay way khuseeyaan ama arimahan waxabay ka taraysaana aynu la kulano, labada week-ku xigana in golahu fasax qabto nin wax qaada iyo nin meeshiisii qabta iyo nin dadkiisii la ooyaba dadku ay dhamaan halkan fadhiga laga kaco wixii aynu ku tari karayno sidaa Cabdinaasir uu sheegay Boqol kun oo Dollar aynu ku tarsanaa odhan lahaa waa soo jeedinayaa waayo xaaladani xaalad dhaba weeyaan kaftan uma baahana wixii aynu tari karnaba qaban karno inaynu ku baaqno ayan anigu soo jeedin lahaa Boqol kaa kun ee Cabdinaasirna waa sakadhi garaynayaa Salaamu calaykum.

**Md.Cabdikariin Aadan Cali** {3mnt, 55sec}: Bismilahi Raxmaani Raxiim, alxamdulilahi Rabbi caalamiin wa salalahuma calayhi wasalam, Mudane Gudoomiye, Mudanayaasha iyo dhamaanba shaqaale weynaha Asalaamu calaykum.

Mudane Gudoomiye waxaan moodaa inuu noqday warkii dhamaan mid isku wada mid ah maadama oo duruufuhu ay isku mid yahiin, waxaynu ognahay in imika in mudo ah lagu soo jiray abaaraha xaga galbeedka ha ku horayso iyo waqooyiga imika wararka aan helayno waxaan jeclaan lahaa in aan idin dhagaysiiyo cajalado la iiga soo duubay deegaanka Gobolka Daad madheedh iyo Togdheer xaaladii abaartu inay hadeer baalka saartay oo ku dhufatay xoolahii ay ku dhufatay cunto la'aan ay xoolahii imika yaacayaan oo kolba meel afka saarayaan imika deeganada qaarkood inkastoo deeganada qaarkood waxay afka saaranba ay yartay taas macanheedu waxa weeye in imika abaartii meel walba ka bilaabantay.

Waxa aynu ognahay in Qoraxdi ay kulushahay dabayl badanina ay jirto hawadina ay qalalantahay, taa macnaheedu waxa weeye in xoolaha cawskii ay cuni lahaayeen iyo dhirtii ay hadhsan lahaayeen intuba ay khatartii ugu badnayd imika waajahayaan hadii arintaasi dhacdo, dadkii jilicsanaa oo ay ugu horeeyaan Caruurta, Dadka waaweyn ee itaalka daran iyo Dumarka uurka leh in ay imikaba inooga baahan yahiin gurmad deg deg ah oo dhakhso ah.

Deegaanada barriga ee ka bilaabmaya Gobolka Daad madheedh sid aynu ognahay ee uu Xildhibaan Faysal sheegayay biyo la'aantu awalba way ka sii jirtay may jirin weel biyood ceel iyo baliyo ku filan markaa waxay u baahan yahiin in si dhakhso ah loogu diro gaadiidka booyadaha ah oo ukala qaada biyaha meelaha aadka u kala fog fog ee aanay biyahu ka jirin;

In daawooyin loo diro calafka xoolaha in la diyaariyo cuntada caruurta iyo dadka jilicsan in hadda la ii hor mariyo; waxaynu qiyaasi karaynaa inaanu gurmadka hadda bilaabmay wax muddo yar ku soo dhamanaya ahayn waa abaar muddo dheer jiri doonta, haddii aanu Ilaahay SW faraj inoo furin sidaynu uga baranay.

Bisha aynu ku jirnaa waa July waa bil xagaaya Jiilaal wali lama gaadhin iyo wakhtigii Kaliisha la odhan jiray sidaa daraadeed waa inaynu u diyaar garawno xoolaha inaynu evacuate-garayno haddii kale xoolahu way jabi doonan waxa dhici doonta wakhtiyada Jiilalka haddii la gaadho in xoolahu aad iyo aad ay u riiqmaan.

Dadka jilicsan iyo xoolaha sidii loo evacuate grayn lahaa ee loo gayn lahaa  meelo lagu kaydiyo oo wax lagaga reebo waa in la diyaariyaa sida meelaha seeraha oo kale.

Inaka Gole ahaan sida saaxiibadaydii hore ay sheegeen waxa muhiim ah in aynu ka qayb qaadano gurmadka oo aynu waliba ugu horaysiino oo aynu isku darno arin iyo aduunba aynu isku dayno.

Waxaan soo jeedin lahaa in Xildhibaanadeena laga gooyo Lacag ilaa Boqol ilaa Boqol iyo Labatan kun sadexda bilood ee soo socda, shir gudoonkuna si kastay u dadaalan ila Konton kun ay ku daraan.

Ilaa Boqol iyo Todobaatan kun maanta aynu jarno inagu aynu isku tiirsano gurmadka ugu horeeya Insha Allahu tacalaa.

Arinta kale ee aan xaga bariga ka jirin, waa sadex sadex boqol oo dollar bishii xildhibaankastaa oo sadex bilood ah wey ka badan tahay in aynu lacag intaa leeg gaadhsiino.

Arinta kale ee xaga barigu aad uga madhanyahiin waxa ka mid ah gurmad daawo, mobile teams-ka ka jira gobolada kale kama jiraan Gobolada bariga , markaa waxa weeye in hadadan la diyaariyo in mobile teams xaga caafimadka la sameeyo in inagu hadaynu nahay xildhibaanadii aynu xukuumada collaboration la bilawno; degmo kata iyo gobolkastana team isku dhafan oo dawadii, xanaanadii xoolaha, calafkii iyo daryeelkii guud ee bulshada iskugu wada jira in degmo kasta iyo tuulo kastaba laga sameeyo. Ma doonayo Gudoomiye iyo mudanayaal inaan ku dheerado aad iyo aad baad u mahadsantahiin Wa salaamu calaykum.

**Md. Abokor Siciid Cali** {4mnt, 7sec}: Bismilahi Raxmani Raxiim, Alxamdulilahi Rabbil Caalamiin wa salalahuma Calayhi Wasalam; Shir gudoonka, Mudanayaasha, shaqaalaha iyo saxaafadaba Asalaamu calaykum waraxmatulah.

Mamduuca maanta ee ku taxaluqa xaalada abaaraha ee dalka runtii waxa ay ujeedadiisu tahay sidii si qotodheer loogu fahmi lahaa xaalada abaarta ee taagan iyo waliba saameynta ay abaartaasi ku yeelan doonto mustaqbalka dalkeena , een marka aynu ka waran xaalada imika waxa aad inoogu faah faahiyay Gudoomiye xigeenka labaad iyo Gudoomiyaha Gudida joogtada ah oo runtii ka waramay xaalada abaarta ee galbeedka sidoo kale waxaan ognahay in abaartu ay ka jirto Gobolada kale ee leh xeebaha ee Sanaag iyo Saaxil Ikn imika kolkaan si toosa u dul istaagno abaartaasi xaaladeeda; xiligani waa xiligii dadka reer guuraagi dhulkani dagani ay uquluIi jireen macnaha ay u hayaami jireen dhul daaqsimeedkaasi xeebaha.

Mar haddii dhulkii ay hayaami jireen ee dadkaasi daaqa u doonan jireen ay abaarta intaa le'eg ka jirto taa macnaheeda waxa weeyaan in abaar baahsani ay ka jirto dalka in taa loo fahmaa waa qodob, heerka ay abaartaasi taagantahayna waa mid nololeed oo dad iyo duunyaba leh, mid dhaqaale oo saameyn ku yeelan doonta guudahaan dalka iyo deegaankii oo isna xaaluf ka jiro.

Sidaa darteed waxaan ugu horayn leenahay, Allaha weyn ee waaxidka ah ee awoodiisu ay kaafiyi karto inaan weydiisano in abaartaa ilaahay inaga soo jabiyo oo ilaahay dag dag inoola soo gaadho naxariistiisa weyn; intaa dabadeed waxaan anigoo u mahadnaqaya xukuumada oo guddi u saartay in arintaasi islamarkaana Gobolada lagaga dhawaaqay Guddiyo Abaareed, waxaan ku baaqi lahaa in Golahu Guddi u saaro, arintani maaha arin ku haboon in kali kali loo cararo, lkn waxa lagaga bixi karaa iskaashi la iska gaashado wixii Golahu ku tarayo wixii ganacsatadu ku tarayso, waxa Ha'ayadaha samafalku ku tarayaan waxa guud ahaan dawladu ay ku tarayso oo iyadoo la midaysan yahay lagu gurmado.

Waxa kale oo aan soo jeedin lahaa in aad loo dhiiri galiyo oo meel la saaro sanduuqa gurmadka dag dag marka ay xaalad dag dagi jirto inaan marba la car cararin ee qaranka ay u qorshaysanaato ayna lahaato Ha'ayad gurmadka dag dag ah islamrkaana qaadheenkeeda iyo qorshaheeduba uu yahay in ay si dag dag ah wax uga qabato, xaalad kasta oo dag dag ah ama masiibo dabiiciya oo timaada si ay markaa si wada jira oo inta la isku soo gaadhayo xitaa ay wax uga sii qabato.

Arintani waxa ay u baahantahay in la eego saameynta ay abaartani keenayso; waxa ay keenaysaa nafaqo daro ku timaada dadka iyo duunyadaba markaa waxa ay u baahantahay in qiimeyn dhaba laga yeesho oo aan kaliyaata ahayn in imika idoo la yar cararo ee waxa ay u baahantahay qiimeyn dhab ah oo dadkaasi xitaa wixii xooladahooda ay ka baxeen wax looga tari lahaa meel la saaro markaa arintani ishkaashi wadareed dhamaan haday tahay Ha'ayadaha samafalka, haday tahay Saxaafada laftarkeeda iyo warbaahinuhu inay ka qayb qaataan sidii qaylo waa cid keene si aynu arintaa isaga gurmano.

Ilaahayna SW marka la isu naxariisto ayuu naxariistiisa ina soo gaadhsiin, aad iyo aad baa Ilaahay waxa u wadaydiisanaynaa inuu ilaahay inaga soo jabiyo. Walaamu calaykum.

**Md. Maxamuud Saalax Cabdi** {5mnt, 5sec}: Bismilahi Raxmaani Raxiim, Asalaamu calaykum, shir gudoonka, mudanayaasha sharafta leh saxaafada iyo shaqalahaba waa salamayaa salaantaa ka dib.

Mawduuca maanta aynu ka hadlaynay wuxuu ahaa xaalada abaarta wadanka ka jirta, waxa aan marka hore tilmaami lahaa sida laga waramay xajmiga abaarta oo gobolada qaarna aad iyo aad u sii daran sida aynu naqaano waxa lagu qiyaasaa darajooyin abaarta inay heer qaran tahay heer ka ku xiga heerarkaas oo dhan baa ka jira gobolada wadanka, sida ay kula badan yahiin ama ukala culus yahiina way u kala culus yahiin gaar ahaan gobolada xeebaha leh oo sanadka roob ka di'in gu'ga inta badan iyo kuwii ka horeeyay ba.

Abaartu wey ku badan tahay Sanaag, Awdal iyo Saaxil gobolada kalee Togdheer, Saraar iyo gobolada Hawdka sida laga waramay iyo Oogaduba wey la qabaan markaas waxaan horta soo jeedin lahaa xajmiga abaarta laga warbixiyay ama halkan golaha laga war bixiyay ama la qiyaasayo iyo xajmiga abaartu aniga waxay ila tahay inaanay islahayn.

Waxa weeye xajmiga abaarta in ay ka adkaato sida hada loogu dhawaaqay, sida uu xildhibaan Bashiir sheegayay jawaabta laga bixiyayna waxa uun ay ku koban tahay in wasiirada, madaxweynaha iyo madaxweyne ku xigeenku ku baaqeen in ay ka jawaabaan oo musharkooda wax ka jaraan; ta xildhibaanaduna wuxuunay la micno noqonaysaa intay doonto ha leekaatee taas oo kale.

Lkn anigu waxaan qabaa in lagu dhawaaqo gunti giijis rasmi ah oo mahaariicda wixii ku jiray miisaniyadii hore ee aan ku saabsanayn biyahaha iyo waxyaabahaa dhamantood la hakiyo in shidaalka la jaro; wax yaala kale ee shaqada in maalintii haddii afar baabuur ku soo shaqo tagi jireen wasaaradahu ay hal bus ku soo shaqo tagaan oo shidaalkii loo jarro in booyadaha lagu dhaariyo in wax kasta oo aynu haysanay tashiilno oo u weecino shaqo kasta oo aynu qaban jirnay aynu u weecino inaynu dadka iyo xoolaha badbaadino ama calaf aan u raadino ama wax kale aan u raadinee .

Taa macnaheedu waxa weeye culayska abaartu leedahay waxay tahay inaynu kaga jawaabno sidaa aan sheegay oo gunti giijis dhab ah galo oo shaqooyin kale ama wax kale oo aynu qaban karnaa anay jirin maanta mashaariic la qabankaraa haddiii ay rabaan in mashaariicdaa in meelo kale loo jeediyo waxa ay ka soo codsan karaan golahahu inuu dib; markaa anigu waxaan soo jeedinayaa in xukuumadu arinkaasi dib u qiimeyso oo ay wixii kale oo ay gacanta ku hayso oo kale intay dhigto ay hawsha u wareejiso inay dadkaa iyo xoolaha loo gurmado; sidaa la sheegaynayan waxaan ku raacayaa qaadhanka Golaha oo ay tahay in gudi loo saaro aynu qiimeyn rasmi ah lagu sameeyo, oo aynu wali dadaalo oo awoodeena iyo karaankeena intaba isku darno oo aynu kaga qayb qaadano;

Sidoo kale waxay u baahantahay sidaa la sheegay uma baahana inay hebel iyo hebel ee intaan ka war hayo anigu dee goboladaa bariga dhibaatada ka jirtaa waa labadaa qaybood ee aynu sheegnay midnina waa biyo la'aanta oo inta Oogada qoolan ee laamiga wixii ka xiga Oogada wixii ka xiga xaga Gubanka iyo xeebaha iyo buurahana abaar rasmi ah baa ka jirta .

Markaa deee mid walib inay qiimeynteeda iyo lahaado way u baahantahay in la soo eego oo laguma guuri karo sahan la'aan oo lama odhan karo meelaha qaar koodna abaar badani ka jirto xoolahii iyo dhimanayaan dadkii meelaha qaarna biyo dhaamis looga baahan yahay si loo ogaado meel kastaa daruufaheeda waxa kaloo Iyana ku raacayaa in la tago oo la soo eego. Salaamu calaykum.

**Md. Cabdiraxmaan Yuusuf badheedha** (8mnt 40sec): Bismilahi Raxmani Raxiim, Asalaamu calaykum. Maanta waxaynu ka hadlaynaa xaaladan ina waajahday ee abaaraha dalka ka jira, Abaaraha iyo Somaliyina in badan bay walaalo soo ahaayeen, oo waxaynu nahay dad xoolo dhaqato ah.

Abaartu laba ayay u qaybsantaa waa baad la'aan iyo biyo la'aan, umadeenan soomaaliyeed hadaan anigu oday ahay xoolo dhaqataa dhinac ka ahay beeralayna waa ahay, abaarahaasi in badan bay I saameeyeen oo anigoo Secondary-ga ka baxay baa gurmadkii u horeeyay galay 1978 bay ahayd; imika dhawr iyo afartan sanadood iyo konton sandood mooyi wax ka danbeeyay, ayaan garanayaa anoo intaas oo foosto gaadhigayga ku qaaday oo hawd u gurmaday; sheekadana waa hayn jiray waalidkay waalidkii sidoo kale.

Haddaba abaarahaasi sidaasay mar walba inoo saamaynayeen waxa jira umadu kali waxba ma qabato xukuumadahaa wax u qabta, oo xukuumadahu waa maskaxdii oo la isku keenay waa la tuujiyaa caalamka kale ayay eegtaan xalkaa la keenaa. Dawlad hore oo jirtay oo xukuumadii Siyaad Barre maskaxdaa la tuujiyay, Jamacadeenii Qaranka waxay soo saartay buug la odhan jiray 'living with uncertainty ' dadka hubaal la'aanta nool.

Waxa laga sheekeeyay Soomaali abaartii Daba dheer iyo siiga case waxaas oo dhan baa laga soo guuray , daba dheer waa ogaydeen sidii wax loo galay ee dadka loo raray, tii baa la yidhi dib bay u soo noqonaysaa xal maxaynu samaynaa; xalkeedii markaa soomali jamacadii baa loo xil saaray aduun weynuhuna waa cawinayay buug aad u qiimo leh ayaa laga qoray xalkii

Waxyaabaha yaabka leh kolka imika aad xasuusataan amaba aad raadisaan buugaa waxa u cajaaib noqday dadkii soomaliyeed waxa laga dhaadhiciyay abaarta la sheegayaa waa kayd wax la yidhaa ood dhigato , abaarta u xunina waa ta jiilaalka dhacda ee afarta bilood meelahaasa ilaa shanta bilood, Soomaliyeey kayd dhigta waa loogu tag waayey cid waliba buugaas baa aad kugu sharaxaaya dadkii waxay leeyahiin Ilahay baa jira waxaa kama sheekayn karno.

Horta Soomali ahaan kolkaan aad udarsay dhibaatada ina haysta waxaynu nahay umada kale ee ilahay dhulakan ku abuuray ama dhulkoo dhan ku abuuray aad baynu uga nasiib wanagsanahay, waxay nu nahay dadka uu ilaahay bay'ada siiyay aanad sanadka oo dhan qofku u baahanayn Guri ee cad ceedi dhibayn ee dhaxani dhibayn ee daba aynu seexano taas oo kaliftay in ilaa maanta in ardaaga la seexdo odaygii reerka xitaa kii beerta guri yar oo istoodha ma dhisto xitaa gaalada inala yaabta kolka ay meelahaa tagaan.

Cimiladan wanaagsan ee ilaahay ina siiyey ee 12 ka biloodba adigu wax baad beeran kartaa mushkilada qudhee jirtaana maxay noqotay waa biyaha iyo baad la'aanta.

Gaalo horta iyo jaamacadeenii iyagu sidaas bay xal u sameeyeen, qoladeenan hadana hadaad doonayso inaad umada wax ka ogaato a geology -gu wuxuu ku odhanayaa umad hadaad doonayso kolkaad ka soo dagto waxaad baadhaa dhaqankooda wixii dhib haysata waxaad ka helaysaa suugaantooda; suugaantii Soomalida markaad baadho xanuunka qudhee ina hayaa wuxuu noqday Biyo la'aan 'Jiilalka oo dheer, dhulka oo abaarsaday, dacar baa nin geesiyi ugu dhabar adaygaa..' Heesaheena oo dhan waa iyada oo rafaad lagu jiroo ay abaari jirto, goorta qofka somaliga ahi farxaanka yahayna waa marka roobku do'o '' oo biyahu galac leeyahiin, seyloo gu'yaal badan ..;' waa markaynu aroosano waa markaynu barwaaqada ku jirno iyo farxada; markaa inaga xanuunkeenina wuxuu noqday biyo la'aan dawadeenina biyahiii oo la helo.

Sidaa loo xisaabtamo ayaa loo baahan yahay buugaa aan idiin sheegayo , waxa jirtay intiinii soo gaadhay waa soo gadheene in Africa saxarahan u dhaxeeya ee Waqooyi xiga dawladaha xiga faransiisku u badan yahiin inuu gumeystay, waxa ka jiri jiray abaaro joogto ah oo aynu BBC aad uga dhagaysan jirnay.

Berigii danbe waa loo fikiray waxa la yidhi maxaynu abaarta ka qaban karnaa; abaarta waxaa number one ah baa la yidhi xoolahaa dhinta, xoolaha haddii calaf loo helo waa la bad baadayaa biyahiina waa la heli karaa xoolahiina way bad badaayaan waad aragteen imika galbeed cajaladahii laga soo duubi jirayteen xoolahii oo wada dhacaya waa kuwa ku dhimanaya biyahii markay cabeen. Calafkaa muhiim ah xal baa la sameeyoo aduunkii qaatay in maraakiib cawsa oo biles ah oo xidhan halkii raashin looga soo gurman lahaa horta dakadihii north Africa iyo west Africa la yidhaahdo cawskii oo xidhan oo kuwan cagaftu xidha ha la keeno; horta abaar danbe oo ilaa 70's ka dhacday dalalkaa east Africa ama subsahara countrieska ma jirto awal sanad walba way jiri jirtay, waxaaba lagu guulaystay marka intii lagu guulaystay in la yidhaa saxarahaba aan iska xidhno oo laynka beeridee laga bilaabay Jabouti Atlantic ayuu halkaa ka galaa .

Haddaba inagu Soomali waxaynu u baahanahay, bahashanu habeen iyo maalin way inagu soo noqnoqonaysaa oo waan la karayn waanay soo gur guuranaysaa , xukuumadeena iyo inaguba inagoo ah kuwii dadka matalaynay, xoolahii dadkii lahaa ahaa, beerahii dadkii lahaa ahaa inaynu xalka ka qayb qaadano waa muhiim ; xukuumadeenana ku dhiirino waar bal ka hortaga aduunka la kaashada oo imika wax kale ha noo qabaninee, raashinka waxa ka horeeya inaad umadaha noo weydiisaan shirkado badan baa jiroo carabta jiroo, shiinahaa beerta wabigan niil, cawska wax jaban baa lagu soo helayaa waar bal gacanta yara hoor sadoo million-ka dollar intaas oo Markab buu soo rarayaaye bal dag dag xoolahan wax ha loola soo gaadho ileen waa inangan qiranay inay sii socotoo barina tagayso hawdna tagayso'e, dag dagaas baa very important ah.

Xildhibaanadeenana waxaan soo jeedin lahaa waar bal inaga anigu kolay waanigaa idiin sheegoo xoolo dhaqato ayaan ahoo, Hargeysa duleedkeeda ayaa Lo'di ii joogtaa, oo

Adhigi ii joogaaye, Go'day ii joogaan, Hawd bay ii joogaan dhibaatadu aniga imika way I haystaa imika booyadaha ka soo baxayay berbera oo Go'dii yaray berhayaba waa lagu haraadan yahay, jirkaanada Go'da weyn baanu uga dhaamin jirnay.

Waar lacagteena iyo waxaynu bixinaynaa si ay u muuqato toban toban tan oo cawskaas ah, kun kun dollar haduu u bato ayuu noqonayaaye umad dhan baynu dajin karnaa, halkaa aan ka bilawno xukuumadeenana aan la tashano waxana halka u dhaw ha laga qabto

Biyaha markay tahay dee waynu ognahay biyahu way gudhayaan marka roobku yaraado biyaha hoose way sii dheeranayaan aan ku dadaalo oo culayska saaro wixii dhaamam la qodi karo wixii dooxyadeenan madhan recharge lagu sameyn karo kaabadihii la dhigi karo wixii noocaa ahaa aan sameyno intaas baan maanta horta ku soo koobayaa xalkaa muhiim ah.

**Md. Cabdilaahi Yuusuf Axmed {7mnt, 10sec}:** Bismilahi Raxmaani Raxiim, Shir guddoonka Golaha wakiilada, Mudanayaasha Golaha wakiilada, Masuuliyiinta kalee inala jooga, Shaqaalaha, Warbaahinta dhamantiin Asalamu calykum.

Ma dheeraynayo anigu in yar oo kooban baan odhanayaa Insha Allahu tacalaa, 4 Bishaan anigu Hargeysa ka baxay waxaan soo maray shan Gobol iyo dhawr iyo toban degmo; Gobolada gobolka Togdheer baa kamid ah, bariga Gobolka Saaxil baa ka mid ah, oo waxa xuduud wadaaaga Gobolka Togdheer, Saraar iyo Sanaag.

Afartaa Gobol xuduudaha ay iska galaan oo dhan baan tagay, oo Gobol walba aan wax ka gaadhay, waxaan tagay Gobolka Buuhoodle, Shantaa gobol ilaa lab aiyo toban Degmaan tagay, duruufaha qaar wey ka midaysan yahiin oo duruufaha Abaarta daran ee aan anigu ku arkay xeebta bariga saaxil marka laga yimaado iyo xuduudahay wadaagan afartaa gobol Abaar aad u daran baa ka jirta.

Wey kala culus yahiin oo marka Burco hawdkeeda loo dhaqaaqo wixii Buuhoodle xiga waxa ka culus wixii Burco waqooyigeeda xiga ee xagaa ilaa bariga gor gor laamigaa dheerba waqooyi ka xiga ee Saraar gashan ilaa Sanaag u ceshan ee xeebta u ceshan Abaar aad u adag baa ka jirta wey kala culus yahiin oo waa meelaha ugu culus; meelahaa waxa ka jirta Biyo la'aan baa ka jirta, waxa ka jirta adeegyada caafimadka oo aad u hooseeya; Degmo kamida degmooyinka anagoo joogna baa Islaan waayeel ahi jabtay xumad jabin baa laga waayay Degmana wey ahayd xanaano ayay lahayd adeegyo caafimad baa ka dhisnaa markaa horta duruufaha noocaas ah baa ka jira.

Waxaan soo jeedinayaa inaga oo xukuumada oo Madaxweynaha iyo Wasaaradaha ay khuseysaba in Insha Allahu tacalaa adeegyadaa caafimadka aad loo xoojiyo, oo xukuumadu meel kasta oo degma oo adeegyo caafimaad leh ay dawooyin geyso at least oo ay dhaqaajiso Wasaarada caafimadku; waxa kale oo duruufaha ay deeganadaasi

qabaan ka mid ah, xaga waxbarashada oo Iskuulada badankooda aanay macalimiintu mushahar helin, waxa kamid ah meelo 200km isu jira ama 100km oo aan Saldhig lahayn oo aan adeeg amni lahayn oo u baahan in saldhig laga sameeyo haday tahay xaga amniga iyo haday tahay xaga dhul daaqsimeedka oo laba calaamo haystaan.

Sixid Gudoomiye Giire:" *Mudane Adiga oo raaliya, waxaan jeclahay Mudane in dooda xaalada Abaarta lagu koobnaado adiga oo raaliya Mudane."*

Duruufahaan ku aragnay deegaanada weeyee, shantaa Gobol ee aan anigu maray Gobolka Buuhoodle waxa weeye isagu iyo hawdka Burco marka la gaadho wixii hawd; hadaan naxariisi di'in wey sii fidi kartaa markaaa duruuftaasi wey jirtaa ee duruufaha kale ee jiraa waxa weeye ee u baahan inaygu Gole ahaan masuuliyadeena ay tahay Miisaniyadii 2025-kii adeegyo aynu ku ansixinay adeegyo muhim u ah adeegyada bulshada oo dagmooyin ah oo miisaniyadii kalabadh bay maraysaa laba quarter baa dhamaaday ayaa jira oo aan adeegyadaa aan miisaniyada ku ansixinay aanay galin , Gollahu u codeeyay ee Baarlamanku, ee Madaxwaynahu saxeexay ee xukuumadu wareegtooyinkii wasaarada maaliyada la saaray; Gudida dabagalka iyo Gudida dhaqaalaha iyo Hanti dhawrka Guudba waa inay hawlahaa waajibaadkooda ka gutaan oo daba galaan waxa kale oo jira.

Sixid Gudoomiye Giire: " *Xildhibaan adoo raaliya doodu waxay ku saabsantahay Abaarta, Maaliyada iyo Miisaniyada iyo arin kale midna uma socoto Abaarta waxaad aragtay iyo waxaad ka odhanayso xildhibaan."*

Gudoomiye waxa weeye deegaanada duruufaha la soo arkay ee Abaartu ka mid tahay waa waajib in la sheego, Golahani wuxuu matalaa shacabka ayuu matalaa wuxuu matalaa oo masuul ka yahay shacabka duruufaha yaala in la sheegana waa waajib weeye hawlahaasina waa shaqo ay nu leenahay oo u baahan inaynu daba galno cidii aan fulina talaabo laga qaado oo cida ay khuseysaa ay talaabo ka qaado oo la daba galo taasina waa taa weeye.

Waxa kale oo jirta oo Gobolka Buuhoodle duruufaha haysta ka mid ah oo xadadka dadka aynu jaarka nahay ka soo gala oo duruufo adag baa ka jira taa lafterkeedu masuuliyadeena ayay ka mid tahay sidii loo xakamayn lahaa ee aynu xukuumadana ula wadaagi lahayd.

Gudoomiye Giire:- *"Xildhibaan adiga oo raaliya, Abaar qudha ayaynu ka hadlaynaa, markale ayaan ku siin doonaa dood aad kaga waranto deegaanadii Abaartaas aan soo arkay xalkuna waa sidaa. Mudanayaal bi kuli ixtiraam maaha in laga baxo Topic-ga."*

Guddoomiye duruufaha iyo abaarahu wey is barkan yahiin waxa weeye duruufta abaartee xalka waxay u baahantahay xukuumadu guddi abaareed bay magacawday laba gacmahood wax laguma wada wadee Gudida abaaraha iyo Gole weynahu waa inay kulmaan, xukuumadaa ka masuul ah wixii ay inooga baahatana inaynu ku gacan siinaa

wixii kale iyo wixii war bixin ahana aynu u gudbino inagu; inagu tilman iyo gudbin baynu leenahay markaa anigu taa ayaan aminsanahay inaynu ta abaarahana loo maro duruufuhuna wey fidayaan oo sidaa loo sheegay abaarahu dalkoo dhan bay ka jiraan duruufaha iyo shaqada kalaynu leenahayna waa inaynu qabanaa weeye oo aanad Gudoomiye si gaar ah hogaaminta ayaad leedahaye Xildhibaanku hadduu dood qaato dooda iyo hadalkiisa ma xukumi kartid hogaaminta waa inaad ku joogtaa Xildhibaanku 5-minute ka uu hadlayo xaq buu u leeyahay eeriyooyinka uu ka hadlayna xaq buu uleeyahay oo xeer hoosaadka u ogol; markaa waxa weeye Gudoomiye arimaha foleriga arimaha ka daa, waxa weeye Insha Allahu tacalaa waxaynu ka hadlaynaa duruufta abaaraha ayaynu ka hadlaynaa haddii xildhibaanadu waxay u bateen in qiimeyn la sameeyo golaha laba toddobaad uu fasax galo hadii taa la isla qaatana waa ii inaad taa hogaamisaa golahana fasax la galiyaa aad iyo aad baad u mahadsantahiin.

**Cawad Cali Maxamed** — **Agaasimaha W. Shuruucda & H/qoraalka G/Wakiilada**

--------------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle** — **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada**

--------------------------------------